

# Adeegyada Taageerida Luuqaddaha Kala Duwan ee Uprise Health

## Taageerid Dhamaystiran oo ah Luqadda Aad Doorbidayso

Uprise Health, waxaan aqoonsanahay muhiimada ay leedahay bixinta daryeelka caafimaadka dhimirka/maskaxda iyo adeegyada taageerida ee lagu bixiyo luqadda aad sida ugu badan ku qanacsan tahay. Waxaa naga go'an inaan bixino taageerida luqaddo kala duwan ah si aan u hubino in xubin kasta uu si sahlan iyo kalsooni leh ku heli karo daryeelka ay u baahan yihiin.

## Taageerida Luqaddaha Kala Duwan ee Kulanada La-talinta

Markaad la xiriirto kooxdeena taageerida la-talinta, waxaad heli kartaa in ka badan 200 oo luqaddood oo kala duwan. Kooxdeena qaadashada waxay la shaqeeyaan turjumaano si ay kuugu xiraan bixiye buuxinaya baahiyahaaga gaarka ah. Intaa waxaa sii dheer, shabakadeena waxay u sii balaarataa boqollaal daaweeyayaal bil kasta, taasoo kor u qaadeysa awoodeena ah inaan kugu beegno xirfadle ku hadla luqadda aad doorbideyso. Si aad u bilowdo, kaliya wac EAP oo codso luqadda aad rabto, oo wixii kale anagaa qaban doona, anagoo hubinayna heerka ugu sarreeya ee taageerida.

## Taageerid Dhaqaale

Waxaan ku bixinaa adeegyo tababar dhaqaale afka Ingiriisiga iyo Isbaanishka, iyo marka la codsado, luqaddo kale iyadoo aysan jirin lacag bixin dheeraad ah. Kooxdeena taageerida ee heellan waxay diyaar u yihiin inay kaa caawiyaan maaraynta dhaqaalahaaga iyo ku gaarista yoolalkaaga/ujeedooyinkaaga maaliyadeed oo lagu bixin luqadda aad sida ugu fiican u fahmayso. Fadlan wac EAP si laguugu beego tababare maaliyadeed oo ku hadla luqadda aad doorbidayso, iyo si aan kuu siino hagida aad u baahan tahay si aad u guulaysato.

## Taageerid Sharciyeed

Kooxdeena taageerida ayaa awooda inay ku jawaabaan wicitaanada Afka Ingiriisiga iyo Isbaanishka labadaba. Wixii luqaddo dheeraad ah, waxaan isticmaalnaa LanguageLine si aan u hubino isgaarsiin cad oo waxtar leh. Waxaan kugu beegi karnaa qareen ku hadla luqadda aad doorbideyso, iyadoo in ka badan 50 luqaddood laga heli karo shabakadeena. Si aad u hesho taageerid sharci, wac EAP oo cadee luqadda aad doorbideyso. Waxaan halkan u joognaa inaan ku siino taageerida aad u baahan tahay, oo ah luqadda aad ku hadasho.

## Waxaan Halkan u joognaa Caawin

Uprise Health waxay u heellan tahay wax ka bedellida bixinta iyo helitaanka daryeelka caafimaadka dhimirka/maskaxda. Anagoo bixinayna adeegyada taageerada luqaddaha kala duwan, waxaan hubineynaa in luqadda aysan weligeed u noqon caqabad helitaanka daryeel tayo leh. Wixii ah baahiyada taageerid ee ah luqadda aad doorbideyso, wac EAP: 1-800-395-1616



©Uprise Health